# SOMALI VOICE OF NEW ERA, PROGRAM NO 1040
# WARQADII KOWAAD EE RASUUL BUTROS
# 2:18-3:1

Halkani waa raadiyo Transworld oo idinku soo dhowaynaya barnaamij tafsiir ah oo soconaya muddo nusa-saac ah. Waxaana barnaamijkan Codka Waayaha Cusub ee waxbaridda ah idiin soo diyaariya Masiixiyiin Soomaali ah, waxaana laga maqlaa barnaamijkan habeenka Isniinta ilaa iyo habeenka jimcaha, saacaddu markay tahay 7:25ka fiidnimo, mawjadda 31ka miterband.

**OPENING SINGNATURE TUNE UP 25 SEC. AND UNDER.**

Mar kale ayaannu dhegaysatayaal idinku soo dhowaynayaa barnaamijka, waxaannu horey idiinku sii wadaynaa daraasaadka aynu ka soo xiganayno kitaabka qoduuska **ah ee aynu ugu magac-darnay**, "Dhex-marka Kitaabka Qoduuska ah."

Waa barnaamij aad ku baranaysaan kutubta Babaylku uu ka kooban yahay, haddii ay ahaan lahaayeen kuwii Axdigii Hore iyo kuwa Axdiga Cusub.Waxaannu horey idiinku sii wadaynaa dhegaystayaal casharradii aynu ka soo xiganaynay Warqaddii kowaad ee rasuul Butros. Waxaa warqaddu isugu jirtaa waxbaris, guubaabo iyo weliba dhiirrogelin.

Isagoo hoga-tusaalaynaya masiixyiintii wakhtigiisa iyo weliba kuweenna maata nool, ayaa waxaa rasuuul Butros leeyahay, sida ku qoran isla Warqaddan kowaad cutubka 2:1-2, baalka 405 ee Axdiga Cusub, sidatan:

**"Haddaba sidaas daraaddeed iska wada fogeeya xumaan oo dhan, iyo khiyaano oo dhan, iyo laba-wejiilenimo, iyo xaasidnimo, iyo cay oo dhan, oo sida carruur dhallaan ah u jeclaada caanaha ruuxa ee saafiga ah,**

**si aad ugu kortaan xagga badbaadada."**
**SONG: REEL----CUT-----**
Dhegaystayaal markii noogu dambaysay waxay inoo joogtay aayaddii 17aad iyo faalladii gaabnayd ee aynu ka bixinnay. Haddaan faallada horey idiinku sii wadno ayaa waxaa rasuulku uu ku leeyahay muuminiintii qurbaawiga ahayd, **"Ciseeya boqorka."** Haddaba ciso iyo sharaf ayuu innaga mudan yahay kan inoo taliya. Haddaba micna yeelan maysi sida madaxda qaarkeed ay u itaal daran yihiin, laakiin marba haddiiay kursiga ku fariistaan waa in la darajeeyo. Waayo waxaa loo baahan yahay kala dambayn iyo maamuus in bulshada dhexdeeda uu ka jiro.
Mana ahan qofka Masiixiga ah inuu carqaladeeyo hab-sami-usocodka sharciga iyo kala dambaynta shacbi weynaha. Haddaan dib ugu soo noqonno meeriska cutubka 2aad, ayaannu horey uga sii wadaynaa halkii aynu xalay ku dhaafnay, waxaanan idiin akhriyeynaa aayadda 18aad, waxaana Qorniinku leeyahay sidatan: **"Midiidinyadow, ka cabsada oo ka dambeeya sayidyadiinna, mana aha kuwa wanaagsan oo idiin roon oo keliya, laakiinse xataa kuwa qalloocan."**
Wuxuu rasuulku leeyahay, **"Addoommayohow, sayidyadiinna ka dambeeya."** Haddii aynu eegno bulshadeenna maanta ayaa warbixintu noqonaysaa: **"Shaqaale-yohow sayidyadiinna ama boosaskiinna ka dambeeya."** Dad badan ayaa waxay aad u jeclaystaan inay ka hoos shaqeeyaan madax masiixiyiin ah. Habas eyeeshee waa sidee haddii nin aan Masiixi ahayn aad ka hoos shaqaynayso, adiguna aad tahay Masiixa?
Rasuul Butros oo taas ka jawaabaya ayaa wuxuu leeyahay, **"...ka dambeeya sayidyadiinna, mana aha**

**kuwa wanaagsan oo idiin roon oo keliya, laakiinse xataa kuwa qalloocan."** Waxaa la doonayaa inaad Sayidkaaga ama kaabba-shaqaalahaaga aad daacad u ahaato inta waxa uu adiga ku weyddiisanayo ay waafaqsan yihiin sharciga. Haddii beeraha laga shaqaynayo, ama saraac la abuurayo, ama kalluun la dabayo.
mar waliba ee uu kuugu amro wax ku taxluuqa shaqada, waxaa la doonayaa inaad u hoggaansanto. Wixiise daacaddaroo ah oo aan sharciga waafaqsanayn ku raaci maysid. Loo fasiran maayo in marka la leeyahay ka cabsada ama ka dambeeya sida in wax waliba looga dambeeynayo, laakiin waa in wax waliba ee khuseeya shaqada looga dambeeyo. Waa xorriyad doorashadaada ku xiran, waxaanad u yeelaysaa si ikhtiyaar ah, mana ahan in ninka adiga shaqada kaaga sarreeya uu yahay nin magac weyn leh, laakiin waxad sidaas u yeelaysaa adiga oo doonaya inaad Masiixa darajayso.
Waxaa kaloo qofka Masiixiga ah uu ku muujin karaa ammaanta Ilaah dabiicaddiisa iyo ficilladiisa markay joogto sida uu hawsha u wado. Weli waxaannu ku jirnaa dhegaystayaal meeriska cutubka 2aad ee Warqaddii kowaad ee rasuul Butros, waxaanan idiin akhriyeynaa imminka aayadaha 19-20, waxaana qorniinka qoduuska ahi leeyahay sidatan:
**"Waayo, tanu waa wax loo bogo haddii nin niyada xagga Ilaah uga adkaysto dhibaatooyinka, isagoo xaqdarro ku xanuunsanaya. Markii aad dembaabtaan, oo laydin garaaco, haddii aad u dulqaadataan, maxay ammaan leedahay? Laakiinse markaad wanaag fashaan oo aad xanuunsataan, haddii aad u dulqaadataan, taasu waa wax Ilaah u bogo."**

Wuxuu rasuulku u caqli celinayaa masiixyiinta oo wuxuu leeyahay, **"Markii aad dembaabtaan, oo laydin garaaco, haddii aad u dulqaadataan, maxay ammaan leedahay?"** Haddaba had iyo jeer addoommada waa la garaaci jiray oo la silcin jiray oo la xumayn jiray. Maxay taraysaa in qofi wax xado, ama fallaagannimo la yimaado, ama uu qaban waayey hawshii laga doonayey. Waxaa isla markiiba u imanaya oo ka xisaab-qaadanaya sayidkiisa, waxaana la weyddiinayaa wixii uu kaga gaabiyey hawshiisa. Dabadeedna waa la garaacayaa addoonkii fallaagada ahaa.

Butros oo addoommada masiixyiinta ah la hadlaya ayaa wuxuu leeyahay, haddii khaladaadkaas oo kale laydiin garaaco waad u samirtaan, oo kama dooddaan, waayo dilka idinka ayaa isku keenay. Samirka caynkaas oo kale ah Ilaah dhankiisa waxba kaga heli maysaan. Saaxiib, waa suuragal in dhibaato ay adiga ku hayso, iyadoo ay ugu wacan tahay nacasnimadaada. Nin Baayac-mushtar ah ayaa maalin dhoweyd igu yiri, **"Wa nacasnimo ah ayaan sameeyey"**. Nacasnimadiisiina waxay keentay inuu saamigiisii lumiyo, haddama in waxyaabo adiga ay nacasnimadaadu kuu geysay aad u adkaysato Ilaah ammaan kaga heli maysid.

Ha yeeshee mrkii adiga oo wax wanaagsan samaynaya haddana silic kaa soo gaaro wanaaggaaga, oo aad u samirto, Ilaah taas wuu ku farxayaa, oo rasuulkuna wuxuu leeyahay: **"Laakiinse markaad wanaag fashaan oo aad xanuunsataan, haddii aad u dulqaadataan, taasu waa wax Ilaah u bogo."** Markii laynaga gar-daran yahay, mar waliba waxaannu jecel nahay inaynu aarsanno.

Balse waxaan anigu bartay inaan dulqaato, waayo waxaa qorniinku inoo sheegayaa in Ilaah yiri, **"Aarsasho anigaa Iska leh, oo waa laga magan doonaa kii wax bixiyey."** Ilaah wuxuu samaynayaa shaqo ka duwan tan aynu innaga samayn karno, waayo Ilaah wuxuu inoogu aarayaa iyadoo aanay jirin cid ina daba joogta oo inaga aarsanaysa. Waxaa la'ii sheegay in ugu dhowaan kala bar oo bar dadka magaalada muqdisho ku dhinta ay u dhintaan aarsasho.
Waxaa suuragal ah inay qof horey u dileen, iyagoo u aaraya kuwo hore. Iyagiina qolo kale oo xigta la ah kan la dilay ayaa gaadaya, oo markiia y fursad ka helaan ayey dilayaan. Nin waliba ee qof kale bareer u dila, isna mid kale ayaa dilaya. Markaa aarsashada dadku waxay badinaysaa dilka. Waxaa ka wanaagsan in haddii qof la dilo, Ilaah lagu daayo kii dilay, isla markiiba Ilaah baa isaga dembiyadiisa ka jaasaynaya, ama dunida ha uga jaaseeyo ama aakhiro ha uga jaaseeyo e. Sayid Ciise Masiix ayaa wuxuu leeyahay, sida ku qoran Injiilka sida Matayos u qoray 5:11-12 sidatan:
**"Waad barakadaysan tihiin goortii laydin caayo, oo laydin silciyo, oo wax waliba oo xun oo been ah laydinka sheego aawaday. Farxa oo reyrreeya, waayo, jannada abaalgudkiinnu waa ku weyn yahay, waayo, sidaasay u silicn juireen nebiyadii idinka horreeyey."** Butros oo isna ka hadlaya silica, ayaa wuxuu leeyahay, **"Way wanaagsan tahay iyadoo aydaan waxba galabsan inaad Ilaah hortiis ku silicdaan, ama ku dhibtootaan."** Haddaba isagoo aan waxba sii soconin, oo aan hadalka ku dheeraan ayaa rasuul Butros ina xusuusinayaa wax ku saabsan ama ku dhacay

Sayid Ciise Masiix mar kale. Waana Silicii iyo xanuunkii la baday Masiixa, wuxuuna leeyahay, sida ku qoran isla cutubkan 2:21-22. Waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

**"Waayo, taasu waa wixii laydiinku yeedhay, maxaa yeelay, Masiix baa idiin xanuunsaday, oo wuxuu idiinkaga tegey masaal inaad tallaabooyinkiisa raacdaan. Isagu ma uu dembaabin, khiyaanona afkiisa lagama helin."**

Markii Sayid Ciise Masiix dunida yimid, waxaa soo gaaray silic loo dhigi karo laba siyaabood. Marka hore wuxuu u dhibtooday sida qof aadami ahi u dhibtoodo, waa markii uu yimid dunida oo uu qof noqday, Wuxuu kaloo u silcay xaqnima-diisa darteed markii uu u silcay dembiyada dunida awgood. Oo inuu dembiyada dunida dartood u silcay innaga inooma ahan tusaale aynu ku dayanno, laakiin waxay inoo tahay furasho.

Waa sheey aynu rumaysannahay, oo aynu aqbalnay, laakiin wax aynu isku dayi karno maahan. Markii uu dunida joogay Sayidkeennu wuxuu ina siiyey tusaale aynu raacno. Markii uu joogay deegaanka Naasaret ayaa dadku ay ku ka jameen, oo weliba caayeen, oo ay garan waayeen, isla sida Sabuurka 69 uu horey u sii sheegay.

Dabadeedna markii uu raray xaruntiisii, ayaa Injiilladu inoo sheegyaaa, sidii uu xaqnimada drteed ugu silcay. Markii aniga iyo adiguba aynu silic iyo rafaad la kulanno rumaysadkeenna awgii, waxaannu soo xusuusanaynaa tusaalihii uu inoo dhaafay innaga oo ah siliciisii isagoo weliba aan xumaan samaynin. Weli waxaannu ku jirnaa cutubka

2aad, oo haatan gebageba maraya, waxaanan la soo kala baxaynaa baalka 407 ee Axdiga Cusub, warqaddii kowaad ee rasuul Butros 2:23, waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

**"Oo isaga markii la caayay, dadkii caayay cay uma uu celin. Markuu xanuunsadayna ninna ma uu cabsiin, laakiinse wuxuu isu dhiibay kan xaqnimada wax ku xukuma."**

Markii Masiixu dhibka gaaray, isagu ma uusan xukumin, laakiin wuxuu ku wareejiyey Aabbaha. Mar kale aan idin xusuusiyo waxa laynoogu sheegayo Warqaddii rasuul Bawlos u qoray dadkii reer Rooma markaasoo uu lahaa sida ku qoran 12:19, oo wuxuu leeyahay:

**"Gacaliyayaalow, ha aarsanina, laakiin meel u banneeya cadhada Ilaah, waayo, waxaa qoran, Aarsasho anigaa leh; anaa u abaalmarin, ayaa Rabbigu leeyahay."** Haddaba marka ay halkaas joogto waxaa ahmiyaddu tahay in qofku Ilaah gacanta u geliyo aarsashada. Markii Ilaah uu kaaga aaro cadowgaaga, adiga lagu soo raacan maayo, ama qofkii la dilay wiilkiisa oran maayo, Aabbahay hebel baa dilay waa inaan u aaro.

Laakiin wuxuu leeyahay Ilaah baa oofsaday, oo raalli buu ku noqonayaa wixii Ilaah sameeyey. Haddiise adigu aad gacanta la soo baxsdo, oo aad damacdo inaad aarsato, adigana mid kale ayaa ku dilaya. Haddaba aayadda xigta ee 24aad, ayaa laynoogus heegayaa in Ciise Masiix u dhibtooda dembiyadii dunida. Waxaanan la soo kala baxaynaa baalka 407 ee Axdiga Cusub, warqaddan kowaad ee rasuul Butros 2:24, waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

**"Oo isagu wuxuu dembiyadeenna ku qaaday jidhkiisii geedka saarnaa, si innagoo dembi kala dhimannay, aynu xaqnimo ugu noolaanno. Waxaad ku bogsateen xariijimihii karbaashiddiisii."**

Haddaba qidcada ina hor taalla maahan wax aynu tusaale u qaadanayno, siliceennuna maahan mid dembiyadeenna dhaqi kara, iskaba daa dembiyo dad kale ay galeene. Wuxuu rasuulku halkan uga hadlayaa furashada, waana mrka uu leeyahay, **"Innagoo dembi kala dhimannay"**--taasu waa xaaladdii aynu ku sugnayn intaynaan Masiixa u soo leexan.

Waxaa kaloo rasuulku imminka leeyahay; **"Waxaad ku bogsateen xarriijimihii karbaashiddiisii."** Marka ay sidan tahay maxaa laynaga daaweeyey? Haddaba kuwa sheegta in dadka ay ka bogsiiyaan cudurrada ayaa soo xigta qidcadan leh **"Waxaad u bogsateen xarriijihii karbaashidiisii."**

Waxaana aayad la mid ah tan Butros halkan inoogu qoray, horey u waxyiyey nebi Ishacyaah, sida ku qoran cutubka 53aad. Waxay jecel yihiin inay soo xigtaan tan ku qoran kitaabka Ishacyaah, waayo waxyaabaha layska bogsiinayo ee qorniinku ka hadlayo waa dembiga sida rasuul Butros inoogu sheegayo aayadda, waayo rasuul Butros wuxuu caddaynayaa in bogsiintu aanay ahayn tan jidhka laakiin ay tahay tan ruuxa, waxaana qofka laga dawaynayaa dembigiisii.

Markaana rasuul Butros wuxuu caddaynayaa in nebi Ishacyaah aanu ka hadlin bogsiinta jidhka laakiin uu ka hadlayo tan xalka loogu helayo dembiyadeenna, waana taas tan nebigu uu ka hadlayo sida rasuulkuna xaqiijinayo. Haddaan imminka soo koobno cutubkan

labaad ee Warqaddan kowaad, ayaannu imiinka idiin akhriyeynaa 2:25, waxaana Qorniinku leeyahay sidatan:

**"Waayo, waxaad u ambanayseen sida ido oo kale, laakiinse haatan waxaad u soo noqoteen Adhijirka iyo Hogaamiyaha naftiinna."**

Banii'aadanka, hadday yihiin kuwa lumaya iyo kuwa badbaadayada, waxaa loogu yeeraa ido, oo wuxuu rasuul Butros leeyahay,

**"Waxaad u ambanayseen sidii ido oo kale, waxaana aayaddan qudheedu ay tahay, xigasho ka timid kitaabkii Ishacyaah 53, markaasoo nebigu uu lahaa "Dhammaanteen sidii ido baynu u hallownay; midkaya waliba jidkiisuu u leexday, oo wuxuu Rabbigu isaga saaray xumaatooyinkayagii oo dhan."**

Waxana taasu ku qoran tahay aayadda lixaad ee cutubka 53aad. Waxaa haddaba cutubkan mawduuc u ah silicii Masiixa. Masiixu wuu silcay si taasi ay innaga maanta inoogu noqoto tusaale, waxay kaloo tusaale u ahayd kuwii naga horreeyey iyo kuwa inaga damba-imanaya, wuxuuna u silcay oo u dhintay si qiil loogu helo, ama wax loogu bixiyo dembiyadeenna. Wuxuuna ku soo gabagabaynayaa, oo uu leeyahay,

**"...laakiinse haatan waxaad u soo noqoteen Adhijirka iyo Hoggaamiyaha naftiinna."**

MUSIC.

Dhegaystayaal waxaa intaas ku soo dhammaanaya cutubkii labaad ee warqaddii kowaad ee rasuul Butros, waxaana aynu imminka idiin bilaabaynaa oo aad naga sugaysaan:

## CUTUBKII 3AAD EE WARQADDII KOWAAD EE RASUUL BUTROS

Cutubka saddexaad ee warqaddan rasuul Butros waxay ina baraysaa silica inuu keeno nidaam masiixinnimo oo qofka rumaystaha ah laga arko noloshiisa. Waxaa haddaba dabiicadda ama hab-dhaqanka kuwa masiixyiinta ah laga arkayaa ama ay ka muuqanayaa wehlnimada iyo guriga.

Markaa waxaannu ku hor-maraynaa sida qaab-nololeedka qofka Masiixiga ah uu noqonayo marka uu joogo gurigiisa, waxaana aynu imminka la soo kala baxaynaa kitaabka Axdiga Cusub, warqaddkii kowaad ee rasuul Butros 3:1, baalka 407 ee waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

**"Sidaas oo kalena, dumar yahow, nimankiinna ka dambeeya in xataa haddii qaar uusan erayga addeecin ay erayga la'aantiis ku soo hanuunsamaan dabiicadda afooyinkooda."** Marka uu leeyahay, **"Sidaas oo kalena"** ayaa taasu u dhigmaysaa in cutubkan saddexaad uu qayb ka yahay hadalkii hore uga socday cutubka labaad, kaasoo looga hadlayey sida looga dhaqaaqayo sharka ama qofka masiixiga ah uu uga dheeraanayo waxyaabaha markhaati-furkiisa wax u dhimaya.

Markaa dabiicadda afooyinka ayaa waxay keentay in kuwo badan ay dariiqada soo galaan. Waa dabiicadda wanaagsan ee Masiixa wax waliba loogu markhaati-furayo ee hablihii masiixiyiinta ahaa ay muujiyeen. Rasuul Bawlos ayaa wuxuu cutubka 5aad ee warqaddii Efesos uga hadlayaa isla mawduucan ku saabsan degganaanta iyo masaalka wanaagsan ee hablaha gurigooda sida wanaagsan u dhaqanaya. Waa dabiicad wanaagsan haddaba dhegaystayaal tan aynu ka dhaxalnay Masiixa, waxaana loo baahan yahay in

lagu horumariyo barashada qawlka Ilaah. Waxaana rasuul Butros imminka uu kaga hadalyaa warqaddiisan umuuro ka duwan waxyaa-lihii rasuul Bawlos uga soo hadalay Warqaddiisii reer Efesos. Haddaba qaybtaas oo dhan, waa cutubka shanaad ee warqaddii rasuul Bawlos u qoray dadka reer Efesos e, waxay ka hadlaysaa kuwa ruuxa laga buuxiyey sida ku qoran aayadda 18ad ee cutubka 5aad.

Markii Ruuxu kaa buuxamo, maxaad samaynaysaa? Bawlos wuxuu leeyahay, 'sida ku qoran Warqaddiisii reer Efesos 5:25, waxaana qorniinku leeyahay sidatan soo socota: **"Nimankow, idinkuna afooyinkiinna u jeclaada siduu Masiixuba u jeclaaday kiniisadda oo uu nafsaddiisii u bixiyey iyada aawadeed."**

Wuxuu markaas iyada ah ka hadlayaa guri masiixinnimo ay ka jirto halkaasoo ninka iyo naagta isqabaa lagu soo shubay ruuxa, xiriirkuna waa mid, kaasoo ninku uu jeclaanayo naagtiisa ama afadiisa si cajiib ah, ilaa uu gaaro heer uu iyada aawadeed nafsaddiisa u bixiyo. Waxaa ninka laga doonayaa inuu reerkiisa madax u ahaado, naagtana ay maqasho warka ninkeeda. Balse maahan inay wax waliba isaga ku raacdo iyo in loo amro sida loo amro carruurta.

Iyadu waxay leedahay xishmad saa'id ah iyo weliba xormo. Waa in loola macaamiloodaa sida qof kula eg, iyo sida xubin adiga kaa maqan oo kale. Iyadana inay ninkeeda hoos timaadda waa shaqo ay ku aqbalayso ikhtiyaar, mase ahan wax lagu khasbayo. Waa in ninku bilaabo hadalka wanaagsan, oo uu naagtiisa ku yiraahdo anigu waan ku jecelahay. Iyadana waa inay ka jawaabto jacaylka ninkeeda oo ay tiraahdo, mudane

miyaa la arkaa adiga oo kale. Haddaba kuwo badan oo is-guursanaya ayaa waxaa wakhti kaddib ay la kulmaan dhibaato, waayo ma baran inay wadajir uga shaqeeyaan waxyaabaha guurkooda carqaladayn kara.

Haddaba markii aan arko kuwo is-guursanaya qalbiga ayaan Ilaah uga baryaa inay weligood wada joogaan. Waxaad mooddaa in ninka Soomaaliga ah u isa-siiyey gabadha, oo uu u isticmaalo sida inay tahay wax isagu uu iska leeyahay ama maamusho. Lama ahan in gabadhu ay yeelan karto figrad ka duwan tiisa, wuxuuna doonayaa hadduu ku yiraahdo iyada, **"Berri samada ayaan aadaynaa, inay ku tiraahdo nacam mudane waa runtaa."** Waa inaan aniguna ku raacaa. Gabdhuhu waxay leeyihiin xuquuqda ah inay figraddooda ka dhiibtaan maamulka iyo wada-noolaanshaha qoyska.

Haddii xuquuqdeedii la handado, waxaa bilaabanaya intaan da'ba laysku dhalin in lays noco. Wakhtigiina wuu is-beddelay, waxaana imminka bilowday wakhti ragga iyo dumarkuba ay siman yihiin. Waxaa dumarka u bilowday wakhti cusub oo ay garteen xaqooda. Ninna been uma sheegi karo, oo welibana khasab kuma lahan iyada. Haddaba guurku wuxuu u baahan yahay saddex waxyaabood. Waxaa weeye guurka khuseeya wada jirka ninka iyo naagta oo ku salaysan in ninkuna yahay nin naagtuna tahay nin, oo xubnahoodu ay isku baahan yihiin si ubad loo kala helo, ama layskula joogo. Way wacan tahay in ninka masiixiga ahi leeyahay naag jecel oo siisa wax waliba ee dumar uu uga baahan karo.

Naagtuna way u baahant ahay nin masiixi ah oo nolosha la qaybsada oo ay wada-degganaadaan inta ay nool yihiin. Naagtu waa kaalisada ninka, ninkuna waa

kaalmeeyaheeda. Markaa la kala maarmi maayo, hadday noqon lahayd caashaqa, ilamaha iyo weliba wada-noolaanshaha kale. Haddaadan naag lahayn, bal yaa cunno kuu samaynaya? Qaybta labaad habeenka xiga ayaannu ka hadli doonnaa, haatanse aynu wada dhegaysanno qasaa'id ay inoogu luuqeeyaan culimo Soomaali ah oo weliba masiixyiin ah.

**SONG: REEL---CUT----**

Halkani waa TWR, Idaacadda TWR oo idinku leh Ilaah haydin barakeeyo oo haydinku anfoco wixii aad caaway ka maqasheen barnaamijka. Waxaa barnaamij kan oo kale ah ka maqli-doontaan habeen dambe (hadahan oo kale) isla mowjaddan 25ka miterban. Haddiise aad doonaysaan inaad fikirkiinna ka dhiibateen wixii aad caaway maqasheen ayaad nagala soo xiriiri kartaan somtwr@twr.co.ke.

Waxaad kaloo waraaqaha noogu soo qortaan: P.O.Box 21514, oo koodku yahay 00505. Waxaa kaloo aan idin siin doonaa website aad ka maqashaan barnaamijyadeenna Soomaaliga ah, si kuwiinna doonaya inay koorasyo ka qaataan Baybalka ay ugu hirgasho.

**SIGNATURE TUNE UP 6 AND UNDER**

Halkani waa TWR oo idiin rajaynaya Habeen Baraare iyo barwaaqaba leh. Inta aynu ka gaari doonno wakhti aynu ku kulanno Barnaamij la mid ah kan caaway aad maqasheen, waxaan idinku leenahay nabadda Ciise Masiix, ha idiinku badato xagga jidhka iyo ruuxaba Aamiin